Somalian

Su’aalaha had iyo goor la is weydiiyo ee ku saabsan dugsi sare oo cusub oo laga dhiso Haringey Heartlands.

Waa maxay sababta aynu ugu baahanahay dugsi sare oo kale?
Ardayda ku jirta dugsiyadayada hoose ayaa tobankii sanno ee la soo dhaafay aad sare ugu kacay oo u kordhay. Saadaasha ardayda ayaa waxay muujinaysaa in tan la filayo inay sidaas u sii socoto. Sidaas oo kale ayaa tirada ardayda ku jirta dugsiyadayada sare ay sare ugu kaceen illaa iyo heer ay dhammaan dugsiyadu noqdeen qaar ku dhow dhow inay buuxsamaan. Saadaashu waxay muujinaysaa inaynu u baahan doono inaynu furno dugsi cusub ugu dambayn sannadka 2010.

Dugsi noocee ah ayuu dugsiga cusubi noqon doonaa?
Dugsigu wuxuu noqon doonaa dugsi beeleed isku dhafan oo diimo badan oo u shaqeeya beelaha Wood Green, Hornsey iyo Haringey Heartlands oo fursad u haysta inuu ka qayb noqdo ururka adag ee dugsiyada hirgalay.

Goorma ayaa dugsiga cusubi furmi doonaa?
September 2010

Xaggee ayuu ku oolli doonaa dugsiga cusubi?
Goobtu waxay ku dhowdahay istayshinka Alexandra Palace 600 mitir ayayna u jirtaa istayshinada tareenka iyo basaska ee Wood Green, taas u socdaalitaanka iyo ka imaatinka dugsiga ka dhigaysa mid sahlan.

Miyey jiraan isku xidh xagga gaadiidka ah oo wanaagsan oo tegaya dugsiga cusubi?
Goobta uu ku yaallo dugsiga cusubi waa inay dhiirigelisaa isticmaalidda siyaabaha kale ee deegaanta u wanaagsan marka dugsiga la tegayo, tusaale ahaan socodka, isticmaalka baaskeelad ama gaadiidka dadweynaha. Dhalinyarada waxa lagu dhiirin doonaa inay isticmaalaan basaska, oo ay ku jiraan basaska dugsigu, inay baaskeelado kaxaystaan (waxa dugsiga ku oolli doona meelo baaskeeladaha la dhigto), iyo inay lugeeyaan haddii ay saaxiibadood la lugayn karaan. Qabanqaabooyinka gaadiidka ee ardayda leh warbixin ah baahiyo waxbarasho oo gaar ahi waxay noqon doonaan siday dhigayso warbixinta baahida qof kasta sida warbixintooda lagu faahfaahiyey.

Waa maxay miisaaniyadda loogu talogalay dugsiga cusubi?
Miisaaniyaddu waa £26 milyan.

Ka warran helitaanka qalabka ciyaaraha?
ujeedadu waxay weeye in goobta laga helo qalabka ciyaaraha ee ugu badan ee caqligalka ah. Waxa kale oo aanu kala hadlaynaa Kilaabka Ciyaaraha ee Alexandra Park isticmaalidda qalabkooda ciyaaraha.

Immisa arday ayaa dugsiga cusub geli doonta?
Marka hore waxa loo ogolaan doonaa 162 wiilal iyo gabdho ah (6FE). Dugsidu wuu sii ballaadhan doonaa si loogu ogolaado 216 wiilal iyo gabdho

ah (8FE) marka loo baahdo. Dugsigu waxa kale oo uu yeelan doonaa boosas dheeraad ah oo ah waax gaar ah oo loogu talogalay ardayda mucawiqiinta ah.

Sidee ayaan ilmahayga dugsiga u gelin karaa? Waa maxay qabanqaabooyinka ogolaanshuhu?
Qabanqaabooyinka ogolaanshuhu waxay la mid noqon doonaan kuwa dhammaan dugsiyada sare ee beesha ee ku yaalla Haringey. Shuruudda ogolaanshaha ee dugsiyada sare ee beeshu waxay mudnaanta siiyaan ardayda dalbanaysa ee isugu xiga sida soo socota.

- Carruurta leh warbixinta baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah (SEN);
- Carruurta leh baahiyo waxbarasho oo gaar ah, caafimaad, ama bulsho ee u qaba boos dugsiga ah;
- Carruurta leh walaal dhiganaya dugsiga welina dhigan doona taariikhda ogolaanshaha ; iyo
- Carruurta ku nool meesha ugu dhow dugsiga ay doonayaan.

Haddii ay dugsiga soo dalbadaan dad aad u badani, waxa la samayn doonaa liistada sugitaanka boosaskana waxa loo bandhigi doonaa si waafaqsan shuruudda ogolaanshaha ee sare.

Waa maxay takhasuska dugsigu?
Dugsigu wuxuu takhasus ku noqon doonaa farshaxanka iyo warbaahinta oo ka caawin doona inuu ka faa'iido meesha uu ku yaallo ee gaarka ah ee ah rubuca dhaqanka ee Haringey. Waxa kale oo uu yeelan doonaa takhasus dheeraad ah oo ah taageeridda ardayda mucawiqiinta ah.

Waayo farshaxanka iyo warbaahinta?
Goobta uu dugsigu ku yaallo ee isla gudaha Rubuca Dhaqanka ee Haringey ayaa siin doonta awood hay'adaha dhaqanka ee u dhow inay isticmaalaan qalabka dugsiga iyo inuu dugsigu ardaydiisa siiiyo khibradaha iyagoo isticmaalaya qalabka shirkadaha farshaxanka iyo warbaahinta ee maxaliga ah. Waxaanu kala hadlaynaa kuwa maalgelinaya qaybo ka mid ah qorshaha dhismaha si ay u bixiyaan waxyaabo ku habboon wada isticmaalidda qalabyada takhasusiga ah ee farshaxanka, warbaahinta iyo ciyaarta. Dugsiga Tiyaatarka ee Mountview iyo Kulliyadda Farshaxanka, oo labaduba ah shuraakada beesha ganacsiga iyo farshaxanka maxaliga ah, ayaa taageeraya qorsheyaasha Haringey ee ah dugsiga cusub.

Maxaa taageero ah ee ay ka heli doonaan ardayda mucawiqiinta ahi?
Dugsigu wuxuu yeelan doonaa qalab takhasusi ah oo ay weheliyaan shaqaale takhasusi ah oo loogu talogalay 25 carruur ah oo mucawiqiin ka ah xagga waxbarashada. Carruurtaas naafada ka ah waxbarashada waxa boosas u soo doori doona Guddida Baahiyaha Waxbarasho ee Gaarka ah (SEN), iyagoo ku xisaabtamaya waxay waalidku doonayaan, siduu dhigayo Xeerka Dhaqanka ee SEN.

Miyey ICT noqon doontaa qayb muhiim ah oo ka mid ah dugsiga cusub?
Haa. ICT iyo qalabyada takhasusiga ah ayaa ah cunsur muhiim ah oo ka mid

ah aragtidayada waxbarashada. BSF waxay bixisaa fursad, maalgelin, si loo gaadho aragtida ICT ga ee qalabyada ICT ee ugu wanaagsan ee ku habboon dugsi jooga qarniga 21aad.

Waa maxay qalabyada dugsiga ballaadhan ee uu dugsiga cusubi soo bandhigi doonaa?
Dugsigu wuxuu bixin doonaa adeegyo ballaadhan oo kala duwan oo loogu talogalay dadka dhalinyarada ah, qoysaskooda iyo xubnaha kale ee beesha oo ay ka mid yihiin ciyaaraha, madadaalada, nashaadyada dhaqanka/farshaxanka iyo dhacdooyinka bulshada. Waxaase ugu muhiimsanaan doona taageerada dheeraadka ah ee ardayda la siiyo si ay u isticmaalaan qalabyada wixii ka baxsan maalinta dugsiga ee caadiga ah, galbihii, dhammaadka toddobaadyada iyo inta lagu jiro fasaxyada, qaabka weyn ee ICTga ee qaybta ka noqon doona dhismaha cusub awgii.ayaanay tani keeni dooninuun heerar aad u sareeya, laakiin ay gacanna ka gesan doontaa isku xidhnaanta beesha iyagoo ardaydu masuuliyad iska saari doona si fiican u isticmaalidda qalabka dugsigooda waxbarashadooda ballaadhan, horumarkooda jidheed, shakhsiyeed iyo bulshoba. Dugsigu wuxuu qalab siin doonaa xidhiidh adagna la samayn doonaa kooxaha beesha ee badan ee kala duwan ee Haringey iyo dugsiyada luqadda iyo kuwa dheeraadka ah.

Waa maxay siyaasadda ku aaddan carruurta leh Baahiyo Waxbarasho oo Gaar ah?
Dugsigu wuxuu noqon doonaa dugsi isku dhan, isagoo hubaal ka dhigaya inay dhammaan ardaydu helaan manhaj buuxa, oo leh taageero dheeraad ah oo la siiyo kuwa leh baahiyo waxbarasho oo gaar ah. Hababka waxbarasho waxa hagi doona qorsheyaal shakhsiyeed oo ay sameeyeen isla markaana uu ogolaaday arday kasta, waalidkooda, shaqaalaha iyo hay'adaha muhiimka ah si si fiican loogu daboolo baahiyaha shakhsiga. Ardayda waxa lagu dhiirin doonaa inay si buuxda uga qayb qaataan samaynta qorsheyaasha waxbarasho, iyagoo hubaal ka dhigaya in qorsheyaasha la fuliyo iyo qiimaynta horumarka ay samaynayaan.

Waa maxay qabanqaabooyinka Foomka Lixaad?
Ardayda iyo waalidiintu waxay si furan u dooran karaan meesha ay wax ka dhiganayaan 16 jirka kadib. Laakiin sababta oo ah iyadoo uu dugsigani yahay 11-16 jirka oo keliya, ayay ardayda dugsiga ku jirtaa boosas mudnaanta sare leh ka heli doonaan Xarunta Foomka Lixaad ee Haringey ee cusub halkaas oo ay ka jiraan habab waxbarasho iyo shaqo u tababarid oo ay raaci karaan si dhowna ula shaqayn doonta CONEL, oo ah shuraakada xooggan ee gudbinta shaqo u tababaridda ee Haringey. Dugsigu wuxuu awood u yeelan doonaa inuu si buuxda u isticmaalo jawaabta Haringey ee wax ka bedelka 14-19 ee dawladda. Waxa lagu dari doonaa shuraakada 14-19, si ay dhalinyaradu fursad ugu helaan inay dhigtaan dibloomooyin takhasusi ah laga bilaabo markay 14 jirka yihiin iyadoo qayb ka ah manhajka ballaadhan, taas oo siin doonta fursado badan oo ah waxbarashada 16 jirka kadib. Waxa xaafadda oo dhan laga soo saaray koorsooyin badan oo shaqo u tababarid iyo waxbarasho oo loo baahday oo ah heerarka 1, 2 iyo 3. dugsigu wuxuu

noqon doonaa mid ka faa'iida xidhiidhada ay sameeyeen LA iyo kuwa shuraakada la ahi, ee sida fiican wax uga qabtay si ay u daboolaan baahiyaha kala duwanaanshaha ee 14-19 jirka una furan casriyeyn cusub.

Waa maxay qorsheyaasha qaabka shaqaalaynta ee dugsigu?
Waxaanu doonaynaa inaanu abuuro dugsi ay shaqaalaha ugu wanaagsani doonayaan inay ka shaqeeyaan sababta oo ah fursadaha waxbarasho ee carruurta, deegaanta shaqada iyo fursadaha horumarka ee ugu wanaagsan ee shaqaalaha oo dhan. Qaabka shaqaalaynta ee dugsiga waa arrin ay go'aansanayaan guddida maamulku iyagoo la kaashanaya ururka.

Muxuu noqon doonaa manhajka dugsigu?
Dugsigu wuxuu la kulmi doonaa shuruudaha guud sida lagu sharxay sharciga si uu u bixiyo manhaj ballaadhan oo miisaaman. Isagoo ka soo qaadanaya ama isu keenaya waxqabadka ugu wanaagsan ee Haringey iyo meelo kale, ayuu dugsigu horumarin doonaa xirfadaha ardayda iyo kalsoonida xagga fahmitaanka sida ugu wanaagsan ee ay wax u bartaan. Aqoonsiga hababka waxbarasho ee kala duwn iyo dhiirigelinta fursado waxbarasho oo kuwan u dhigma ayaa nuqdad bilaabitaan oo daruuri ah u noqon doonta qorshaynta manhajka. Guddida mashruuca ayaa la sameeyey si ay uga caawiso in la sameeyo qaabka manhajka dugsiga.